IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 29 Maarso 1980 — L. 2 R 3

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 1980, waxaa la meel ma-riiyey Dacwadaha ku saabsan Kirada Guryaha. — Boga 357

SHARCI L. 9 ee 18 Mar. 1980 Toosin iyo wax ka baddelid Sharciga horumarinta Iskaashatooyinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973 — » 358


### QAYBTA LABAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 46 ee 23 Maar. 1980 Cafis doonta Maxkamadda Badbaadada ka Hantiguurisay Jaalle Cabdulcasiis Yaxye Al-Kidi oo Cumaan ah — » 360

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 47 ee 2 Maarso 1980, Magacaabid Maareeye Guud ee Mashruuca Caanaha Banaadir. — » 361


Wakaaladda M. Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 10 Feb-raayo 1980, Xeer Nidaamiye lagu fulinayo sharciga L. 27 ee soo baxay 25. 2. 1973 » 364

WASAARADDA GANACSIGA L. 49 ee 24 Maarso 1980. Diiwaangelin Iskaashatada Dharka iyo Maacuunka ee Deg. Gar. Haarey G/Gedo. » 368

MAXKAMADDA GOBOLKA/ DEGMADA BERBERA 19.3.80 Lumid Jeeg Lr. 032216 ku qoran Shs. 16.000, u leeyahay Xuseen Maxamed Cali L. 131 » 369

MAXKAMADDA G. BANAADIR Lumid Jeeg wareega Lam. 155549, ku qoran Sh. So. 50.000/= » 370

QABTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 8 ee 3 Feb. 80 Waxaa la meel mariyey Dacwadaha ku saabsan Kirada Guryaha.

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. yahay 38 ee 5.4.1972.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. yahay 5 soona baxay 16.8.76 iyo beddelaaddii ka dambeeysay.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. yahay 44 soona baxay 27.11.73 ee ku saabsanaa kirada guryaha.

ASAGOO TIXGELIYAY: Taladii uu soo jeediyey Guddiga Caddaaladda.

ASAGOO TIXGELIYEY: Dhibaatada ka taagan Kirada Guryaha ee Magaala Madaxda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1) Waxaa la meel mariyey in dacwadaha ku saabsan kirada guryaha baaristooda iyo go'aan ka gaaristooda lagu wareejiyo Guddiga Caddaaladda dibna loogu celiyo Guddiyada degmooyinka.

2) Go'aannada Guddiga degmooyinka waa kama dambeys wax racfaan ah oo Guddiga Cadaaladda looga qaadan karaana ma jirtaan.

3) Go'aannada Guddiga degmooyinka kadib marka ay dhaqan galaan waa in si deg deg ah loo fuliyaa.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho 3 Feb. 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCIGA L. 9 ee 18 Maarso 80 Toosin iyo wax ka baddalid Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka ee L. 40 soona baxay 4.10.1973

ISAGOO ARKAY: Qodobada 41,111 iyo 113 ee Dastuurka J.D.S

ISAGOO ARKAY: Sharciyada L. 17,18,iyo 19 ee 1.7.76

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSAN: Iney tahay lagama maarmaan in wax laga bedelo Sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka Soomaaliyeed oo loo xilsaaray Ururinta iyo maamulidda Iskaashatooyinka Dalka oo dhan.

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda.

Qodobka 1aad

1. Ayadoo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed xil uga saaran yahay inuu kulmiyo, Ururiyo, maamulana dhammaan Iskaashatooyinka dalka waxaa awooddii Wasaaradaha ay k ulahaayeen Iskaashatooyinka ee ku tilmaaman sharciga 40aad ee soo baxay 4.10.1973. lagu wareejiyey UDHIS.

2. Sidaas daraadeed wixii qalab, farsamo iyo shaqaalaba ee la xiriira Iskaashatooyinka ee hoos imaanayey Wasaaradda, waxaa lagu wareejiyey Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah uu u dhoofiyo xoolaha iyo badeecadda ay soo saaraan Iskaashatooyinka isagoo la kaashanaya Hey'adaha Dowladda ee ku shaqada leh ganacsiga iyo dhoofinta badeecdda.

Qodobka 3aad

Waxaa la tirtiray Qodobada sharciga horumarinta Iskaa-shatooyinka ee ka horyimaada sharciga lagu dhisay UDHIS iyo sharcigaan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho 18 Maarso 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

QABTA LABAAD
XEER.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 46 ee 23 Maarso 1980, Cafis doonta Maxkamadda Badbaadada ka hantiguurisay Jaalle Cabdulcasiis Yaxye Al-Kindi oo Cumaan ah.

**MADAXWEYNAHA JDS**

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad xubintiisa 10aad iyo tan 14aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY: Fadhigii Golaha Dawladda ee 20.3.80 kuna saabsanaa Cafis uu soo weydiistay Jaalle Cabdulcasiis, Shirkii Golahuna oggolaaday, maadaama aynu xiriir sokeeye oo wanaagsan leenahay Dawladda Cummaan.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa la cafiyey doonta Maxkamadda Badbaadada dalka ee Gobolka Bari ee tirsi yahay 4/80 ee 19.1.80 oo ay kaga hantiguurisay Jaalle Cabdulcasiis Yaxye Axmed Al-Kindi oo Cumaan ah, waxaana la amrayaa in Jaalle Cabdulcasiis celiyo doontii iyo Hantidii saareyd oo dhan.

Qodobka 2aad

Waxaa cafiskaas ka reeban labadi nin oo madaxda ka ahaa doontaas xukunku ku dhacay.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Jaalle Madaxweynaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dowladda.

Muqdisho 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S,

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 47 ee 2 Mar. 80 Magacaabid Maareeyaha Guud ee Mashruuca Caanaha Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. yahay 46 10.9.79 eelagu dhaqan geliyey Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 36 ee 22-4 72

ISAGOO ARKAY: Go'aanka lam. yahay 72 79 ee 17.6.79 oo ay soo saareen Duqa Magaalada Muqdisho iyo Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, kana hadlayey in Mashruuca Maareeye looga dhigo Agaasimaha Waaxda Lo'da D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO ARKAY: Qod. 9aad, 10aad, ee sharciga dhismaha Mashruuca Caanaha Banaadir oo tilmaamaya in maamulka Mashruuca uu ka madax noqon doono Maareeye Guud.

ISAGOO Ay ugu muuqatay lagama maarmaan in Jaalle Cabdi Yuusuf Ducaale lagu Magacaabo Maareeyaha Guud ee Mashruuca Caanaha Banaadir, si loogu gudbo fulinta himilooyinka asaasiga ah ee loo abuuray Mashruucaas isaga ah.

ISAGOO TIXGELIYEY tala jeedinta «Duqa Magaalada Muqdisho iyo Taliyaha Ciidamada Asluubta Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAY XEERKANI

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta Madaxweynuhu Xeerkan saxiixo, waxaa Jaalle Cabdi Yuusuf Ducaale ahaana Agaasimihii hore ee waaxda Lo'da ee D/Hoose ee Muqdisho, lagu magacaabay Maareeyaha Guud ee Mashruuca Caanaha Banaadir maadaama uu yahay nin aqoon iyo waayo-aragnimo u leh habka casriga ah ee Xannaanada Lo'da.

Qodobka 2aad

Jaallahaa xilka lagu magacaabay wuxuu ku mushahar qaadan doonaa darajad iihore u lahaa oo ah (A3) gunnooyinka xilka iyo guriga ee sharci dhaanta ugu dhigan Qeybta (C) ee Wakaaaldaha Madaxa banaan oo ah.

SH.SO. 500/= Gunno Xil

SH.SO. 500/= Gunno Guri.

Qodobka 3aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dalka J.D.S.

Muqdisho 2 Maarco 1980

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 2 bogga lam.
Muqdisho 24 Maarso 1980
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 10 Febraayo 1980

XEER NIDAAMIYE LAGU FULINAYO SHARCIGA LAMB 27 EE SOO BAXAY 25. 2. 1973

MADAXWEYNAHA JDS.

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82 (14) ee Dastuurka J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lamb 27 ee 25. 2. 1973 ee ku saabsan dhismaha Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY : Tala soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

ISAGOO AQOONSADAY : Baahida loo qabo in la sameeyo Xeer Nidaamiye lagu fulinayo Sharciga Lamb. 27 soona baxay 25. 2. 1973.

ISAGOO TIXGELINAYA : Taladii Garyaqaanka Guud ee Dalka J. D. S.

WUXUU SOO SAARAYAA

*Xeer Nidaamiyaha soo socda*

QODOBKA 1AAD

GANACSIGA FILIMADA

1) Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed, kadib markii ay filimada keento, waxay kaga kiraynaysaa Shineemooyinka dalka qiimo go'an iyadoo la tixgelinayo hadba qiimaha filinka, mugga Shineemada iyo meesha Shineemadu ku taallo.

2) Lacagta kirada iyo muddada kiraynta filinka waxaa lagu xadedayaa heshiis dhexmara Wakaaladda Filimada iyo Shineemada Filinka kiraysanaysa.

QODOBKA 2AAD

BAARISTA MAKIINADAHA FILIN-TUSIDDA

1) Wakaaladda Filimadu waxay awood u leedahay inay baaris-farsamo ku samayso makiinadaha filin-tusidda si ay u hubsato habsamida makiinadaha.

2) Haddii ay caddaato in makiinadda filin-tusidda ee Shineemadu ayan si habsami ah u shaqaynayn, Wakaaladdu waxay ka qaadi kartaa tallaabooyinka hoos ku taxan :

b) Inay amarto Maamulka Shineemada inuu makiinadda xumaatay si degdeg ah u sameeyo ama uu u beddelo si filimadu u beddelo si filimadu u nabadgalaan, daawashada dadweynuhana loo daryeelo.

t ) Haddii shineemada makiinadu ay ka xun tahay oo uu Maamulka Shineemadu fulin waayo amarka Wakaaladda Filimada, waxay Wakaaladdu awood u leedahay inay shineemadaas ka joojiso kiraynta filinka ilaa iyo inta laga hubsanayo inay fulisay amarka lagu sheegay xarafka «b» ee qaybta 3aad ee qodobkan.

## QODOBKA 3AAD

### LUMINTAAMA DHAAWACA FILINKA

1) Haddii ay caddaato in shineemo lumiso ama dhaawacdo filinkii ama tusmadii (provino) kireeyey, waxaa xaq loogu leeyahay inay shineemadaasi bixiso qaandhaw.

2) Qiimaha qaandhawga waxaa lagu caddaynayaa heshiis dhex-mara Wakaaladda Filimada iyo Shirkadda filinka leh ee qaandhawga doonaysa.

## QODOBKA 4AAD

### WARAAQAHA DACAAYADDA FILIMADA

1) Haddii ay dhacdo in shineemo lumiso ama ay wax gaarsiiso waraaqaha dacaayadda filinka, waxay Wakaaladda Filimadu xaq ugu leedahay inay qaandhaw ka qaadato shineemadaas.

2) Qiimaha qaandhawga waxaa lagu caddaynayaa heshiis dhexmara Wakaaladda filimada iyo Maamulka Shineemada.

## QODOBKA 5AAD

## QIIMAHA GELIDDA SHINEEMOOYINKA

1) Wax-ka-beddelidda qiimaha gelidda shineemooyinka waxa tala ahaan ugu soo jeedin kara hay'ada awoodda sicir-goynta leh, guddi ka kooban :

b) Qof Wakiil ka ah Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed (GUDOOMIYE)

t) qof Wakiil ka ah Dawladda Hoose ee Xamar (XUBIN)
j) Qof Wakiil ka ah Wasaaradda Maaliyadda (XUBIN)

2) Haddii loo baahdo in Wakaaladdu keento filin heer caalami ah oo qiime badan lagu soo kireystay. Guddigu wuxuu u goyn karaa sicir gaar ah oo lagu galo filinkaas.

## QODOBKA 6AAD

## LAHAANSHAHA AMA KIRAYSIGA SHINEEMO

1) Wakaaladda Filimadu waa lahaan kartaa shineemo u gaar ah waana kiraysan kartaa shineemo.

2) Wakaaladda Filimadu si ay u daryeesho danta dadweynaha waxay kaloo kiraysan kartaa shineemadii xiranta, kaddib markii uu kiraystuhu ama mulkiluhu wadi waayey shineemadaas ama uu mulkiluhu doonayo inuu ka beddelo shineemada ulajeedadii awal loogu talagalay ee ahayd maaweelinta dadweynaha.

3) Habka Wakaaladdu ku kiraysanayso shineemada waxaa lagu caddaynayaa heshiis dhaxmara Wakaaladda iyo kireeyaha.

4) Haddii lagu heshiin waayo qiimaha kirada shineemada waxaa wadajir ahaan u goynaya Dawladda Hoose ee Degmada shineemadu ku taallo. Wakaaladda Fi-

limada iyo Kireeyaha iyadoo la tixgelinayo duruufta deegaanka.

5) Baahida bulshadu u qabto shineemadaas xirantay waxaa qoraal ku muujinayaa Madaxda Degmada Shineemadu ku taallo.

**QODOBKA 7AAD**

**DHAQAN GELID**

Xeer Nidaamiyahan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu ku soo baxo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 10. 2. 1980

**(JAALLE S. GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)**
**MADAXWEYNAHA**
**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

XEER WASAARADDA GANACSIGA L. 49 ee 24 Maarso 80 Diiwaangelin Iskaashatada Dharka iyo Maacuunta ee Deg. Garbahaarey G/ Gedo

WASAARADDA GANACSIGA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS ee dhaqan galay 16.9.79:

ISAGOO ARKAY: Qodobka 113aad ee Dastuurka;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 41aad ee Dastuurka Qeybta Hantida Iskaashatooyinka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 316 ee 17.12.1962;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam .yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka J.D.S. ee dhaqan galay 4/10/73;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu soo qortay Guddoomiyaha Iskaashatada Tawakal ee Degmada G/Haarey, Gobolka Gedo;

ISAGOO TIXGELIYEY: Taladii Guddoomiyaha Guddiga Maamulka ee G/ Gedo.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Tawakal ee saldhigeedu yahy Degmada G/ Haarey ee G/Gedo, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Dharka Maacuunta iyo qalabka dhismaha, waxaa laga diiwaangeliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan Qodobka 15aad ee sharciga lam. yahay 40 oo dhaqan galay 4.10.73

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatda Tawakal ee Ganacsiga Dharka Maacuunta iyo Qalabka Dhismaha ee Degmada G/ Haarey, Gobolka Gedo waxey yeelaneysaa aqoonsi gaar ah oo sharci ku dhisan, xeer gaarkeeduna wuu dhaqan galayaa.

Muqdisho, 24 Maarso 1980

Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga
Axmed Maxamed Maxamuud

## QABTA SADDEXAAD

## MAXKAMADD AGOBOLKA/ BERBERA

MGD 13/F/13/80 Taariikh 19.3.80

UJEEDDO: Lumid Jeeg larm. 032216 Lacagtiisuna tahay 16.00/00

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu soo qortay Jaalle Xuseen Maxamuud Cali, ee uu ku codsaday caddeynta jeeggaasi lumay taar. tahay 15.3.80 kuna wareejiyey J/le Maxamed Cali Barre. Jeegga kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Warqadda Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Deg. Berbera Taariikhdeeduna aheyd 16.3.80.

MARKAAN ARKAY: Qodobka 69 L. 9/9/65 L. 2 waxaa caddaatay in Jeegga Wareegga Lr. yahay 032216, lacagtiisuna tahay 16.000 taariikhdiisuna tahay 21 Feb. 80 uu lumay taariikhdu markey aheyd 3.3.80

### WAXAAN AMRAYAA

### WAXAA NAMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Markale Jeegga kor ku xusan muddo (30) cisho ah, k adib markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan laheyn qof sheegta waa in gacanta laga saaro ninka magaciisa kor ku qoran yahay ama qof ka sita awood sharci ah 30ka cisho waa in la sugo.

K/Guddoomiyaha Max. Gobolka Deg. Berbera
(Xasan Daahir Axme)

L. 131

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

DEK. LAMB. 5/1979

## DEKRETO

Xasan shire Finiin wuxuu hor yimid Maxkamadda asaga oo ah qofka haystay Jeegga War. Lamb. yahay 115940 oo ay ku taalay lacag dhan Shs. 20.292/= kuna qoran magaca Xasan Shire Finiin, wuxuuna keenay Maxkamadda warqadda lamb. yahay 001727 taariikhduna tahay 5. 9. 1979 oo ka soo baxday Xafiiska Maamulka Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed Laanta Hargeysa

Waxaa halka ku bixinayaa Amarkan aniga oo Cuskanaya Qod. 27 Xeerka lamb. yahay 2 ee 9. 9. 1965, in Jeegga War ee lamb. 115940 in la tirtiro waxaana Amrayaa;

A) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

B) Lacagta ah Shs. 20.292/= in Bankigu u celiyo Xasan Shire Finiin 30 Casho Gudahood marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Hargeysa, 15 Sebteembar 1979

**IBRAAHIM FAARAX MAXAMED**

K/S Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

**HARGEYSA**

L. 132

## *MAXKAMADDA* GOBOLKA *BANAADIR*

### GUD*D*OOMIYAHA

HADUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY : in Jeeg Wareega dhumay oo lambar-kiisu ahaa 155549, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q. Xisab G. kuna qor-neyd lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu Iska lahaa Max-amed Dubad Shire sida ku cad warqadda lamb. 60360 Taa-riikh 28.3.1980 oo bangiga Ganagsiga iyo Keydka Soomaa-liyeed Laanta Qeybta Xisaabaha Guud.

HADUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. -965

### WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Qeyb Xisaab G. u beddelo Maxamed Dubad Shire Jeeg wareega ee kor ku tilmaamaan una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aan-ka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda De-moqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hor-taag laga keenin.

Muqdisho 28. 3. 1980

**GU*D*OOM*I*Y*A*HA MAX*K*A*M*AD*D*A GOBOL*K*A BENAA*DI*R**
*Dr.* Ca*bdullaa*h*i* *Maxame*d *Maax*

L. 133